



Vermont Developmental Disabilities Council

100 State Street, Suite #342
Montpelier, Vermont 05633-0206

(802) 828-1310

vtddc@vermont.gov

www.ddc.vermont.gov

Governor Appointed Members

Kaiya Andrews

Rutland

Amanda Bianchi

Swanton

Gina Carrera

Essex

Julie Cunningham

Families First

Anastasia Douglas

Barre

David Frye

Charlotte

Mike Gruteke

Derby

Terry Holden

Jeffersonville

Francoise Kahindo

Winooski

June 25, 2020

Nolasha Dadka Madow waa Muhiim

Golaha naafada Koritaanka Vermont wuxuu si adag u canbaaraeynayaa dilkii Goerge Floyd. In kasta oo aanaan shakhsi ahaan aqoon isaga, hadana wax.aan ognahay inay nolashiisu aad u qiima badan tahay, waanaan ka murugoonayaa khasaarihiisa.Waxaan tacsii u diraynaa qoyska iyo ehelka George FloydQuluubteenu waxay la jirtaa dhamaan dadka midabka leh ee dhibanayaal u ahaa cunsuryada nidaamsan iyo rabshadaha..

Golaha Naafada Koritaanka Vermont waa urur cadaalada bulshada u heelan ilaalinta xuquuqda madaniga ee dadka naafada ah.Waxaan garwaaqsannahay in ku takrifal awoodeed ay tahay wax ay soo mareen dhammaan kooxaha la hayb-sooco.Waxaan garwaaqsannahay in aamusnaanta ay tahay wadaqabasho, kamana aamusi doonnaa cunsuriyadda iyo naxariisdarrada booliska. **Kama aamusi doonno ku takri fal awoodeed.**

Golaha Naafada Koritaanka Vermont wuxuu aqoonsan yahay in kaladuwanaanta ay tahay xoog.

Steve Kieselstein

Burlington

Dion LaShay

Bennington

Hannah Neff

Brattleboro

Ed Paquin

Disability Rights VT

Candice Price

Addison

Courtney Quinlan

Burlington

Jesse Suter

UVM - CDCI

Havah A. Walther

White River Junction

Crista Yagjian

Guilford

Kaladuwanaanshaheenu ka Gole ahaan wuxuu na siinayaa awood. Waxaan ka nimid gees kasta oo

Vermont -Derby line ilaa Bennington, Swanton ilaa Brattleboro. Waxaan nahay khaniis iyo toosan; waan isqabanay oo guurdoon nahay;waxaan u aqoonsan nahay madow, Aasiyaan, bunni iyo caddaan.

Xubinteenna ugu da'da yar waa 26. Xubinteenna ugu da'da weyn waa 67. Qaarkeen baa naafo ah, qaarkeen waxaan nahay xubno qoys oo ka mid ah dadka naafada ah, qaarkeenna waxay ka shaqeeyaan arrimaha la xiriira naafonimada.

Dhamaanteen waxaan dhahnaa “Waa nagu filan

tahay”. Xadgudubka booliska iyo dilka dadka madow ee ay u geystaan masuuliyiinta dowladu waa inay dhamaadaan hada.

Gole ahaan, waxaan ballanqaadeynaa inaan u adeegsanno xooggeenna, kala duwanaanshaheena, iyo dhaqaalaheena si aan ula dagaallano midabtakoorka Vermont.

- Waxaan naga go’an inaan lashaqeyno xulufadeena ururada cadaalada bulshada.
- Waxaa naga go’an inaan nafteenna iyo Gole ahaanba wax ka barinno arrimaha ku saabsan caddaalad darrada jinsiyada iyo isgoyska midab takoorka iyo kartida.
- Waxaa naga go’an inaan horumarino hoggaaminta dadka midabka leh ee ka tirsan ururkeenna.

Waxaa naga go'an inaan qabano shaqada lagama
maarmaanka u ah inaan noqono urur cunsuriyada ka
soo horjeeda.

Midnimo,

Waxaa saxiixay Gudoomiyaha Golaha,
Courtney Quinlan,

A handwritten signature in blue ink, appearing to read 'Courtney Quinlan', with a stylized flourish extending to the right.